# Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waqtigii uu nala joogay waxaan bixin jirnay Sakaatul Fidriga, waxaan ka bixin jirnay qof walba mid yar, mid weyn, mid Xora iyo Adoonaba suus Cunto ah, ama suus caano la qalajiiyey ah, ama suus qamadiya, ama suus timira, ama suus sabiiba

Abii Saciid al khudri-Allaha ka raali ahaadee-waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waqtigii uu nala joogay waxaan bixin jirnay Sakaatul Fidriga, waxaan ka bixin jirnay qof walba mid yar, mid weyn, mid Xora iyo Adoonaba suus Cunto ah, ama suus caano la qalajiiyey ah, ama suus qamadiya, ama suus timira, ama suus sabiiba, sidaas ayaanu u bixin jirnay ilaa uu noo yimid Mucaawiye Binu Abii Sufyaan Ilaahay raali ha ka noqdee isagoo xaaji ah, ama Cumraysanaya markaasuu dadka Mimbarka kala hadlay, wixii uu dadka kala hadlay waxaa ka mid ahaa inuu yiri: waxaan arkaa in labo Mud oo qamadiga Shaam ah ay u dhigmaan suus timira, dadkii taasay qaateen, Abu Saciid wuxuu yiri: laakiin anigu ka tegimaayo inaan ku bixiyo sidii aan ku bixin jirey waligay intaan noolahay.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Sakaatul Fidriga ayey bixin jireen Muslimiintu waqtigii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee iyo waqtigii Khulafadii Raashidiinta ahaa ee Nabiga ka danbeeyey waxayna ka bixin jireen qof yar iyo qof weynba qadar saac Cunto ah. Muslimiinta Cuntadoodu waxay ahayd Qamadi iyo (sabiib): Canab qalalan, iyo (Al aqid): Caano la qalajiiyey iyo Timir. Qadarka Saacu waa afar Mud, Mudkuna wuxuu u dhigmaa nin gacmihiisu dhexdhexaad yihiin labadiisa sacab. Mucaawiye Ilaahay raali ha ka noqdee markuu yimid Madiina isagoo Khaliif ah, oo uu batay Qamadigii Shaam, dadka ayuu u khudbeeyey wuxuuna yiri: waxaan arkaa in laba Mud ee Qamadiga Shaam ah (Saac barkii), ay u dhigmaan hal saac oo timira, dadkiina taasay qaateen. Abuu Saciid Alkhudri Ilaahay raali ha ka noqdee wuxuu yiri: anigu ka tegimaayo inaan u bixiyo sidii aan u bixin jirey waqtigii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waligay intaan noolahay.

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

لجنة الدعوة الإلكترونية
EDC
E-Da'wah Committee